

XUKUUMADDA SOOMAALIYA

Sharciga 27 Setember 1956, lamba. 19

Xeerka loo wakiishay Xukuumadda Soomaaliya si ay u soo saarto Xeerarka Madaniga, Ciqaabta, Habka Madaniga, Habka Ciqaabta, Ciqaabta Ciidamada, Badda iyo Shaqada.

MAAMULAHA

Marku arkay oggolaasha Golaha Xeer-dejinta;

WUXUU SOO SAARAY OO ANSIXIYAY

Xeerka soo socdo:

Qod. 1

Xukuumadda waxaa loo wakiishay in ay soo saarto, iyadoo raacaysa talada Guddiga gaarka, Xeerarka Madaniga, Ciqaabta, Habka adanigaa, Habka Ciqaabta, ciqaabta Ciidaamada, Badda iyo Shaqada.

Qod. 2

Hindise kasta ee Dekereetada Baarlamaniga ee ku saabsan arrimaha ku xusan qod. 1, waxaa la horgeynayaa Golaha Wasiirada iyadoo la raacayo talada Guddiga oo sidaan loo dhisay:

Guddoomiye — Xubin ka mida Xukuumadda oo uu soo magacawday Wasiirka Koobaad;

Xunbno — 7 Xildhibaanh oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Golaha Xeer-dejinta;

— Mid iyo wax ka badan oo ah khuburo xagga sharciga uuna soo magacaabo Wasiirka Koobaad;

— Mid iyo wax ka bdan Qaalliyaal oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda Garsoorka;

— Sarkaal uu soo magacaabo Wasiirka Koobaad oo xilka Xoghaynta qabanaya.

Qod. 3

Guddi kasta waxaa xubin sharci ah ka noqonaya Guddoomiyaha Maxkamadda Garsoorka ama qof uu u soo wakiishay.

Xeerkaan waxaa lagu darayaa uruurinta Rasmiga ee Xeerarka waxaana lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga.

Qof kasta waxaa ku waajiba in ay u hoggaansato una dhowrto ka sharci ahaan Soomaaliya.

Taariikhda, Muqdisho, 27 Disember 1956.

Maamulaha

P. Franca

Cabdullaahi Ciise Maxamuud